Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran Af اللغة العربية,

English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

Feebraayo 19, 2025

Ku socoto: Xubnaha bulshada I/DD, la hawlgaleyaasha Qabaa'ilka iyo shaqaalaha ODDS
Ka socoto: Dana Hittle, Agaasime Ku-meelgaar ah, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)
Mawduuca: Mashruuca ayaa wuxuu bilaabay inuu dib u qiyaaso SACU

Dabayaaqadii sanadkii la soo dhaafay, waxaanu wadaagnay qorshaheena si aan si dhow ugu eegno hadafka iyo qaab-dhismeedka Cutubka Xasilinta iyo Dhibaatada (Stabilization and Crisis Unit, SACU). Dib-u-eegistani waa muhiim. Waxay naga caawin doontaa inaan xaqiijino dadku inay helaan adeegyada saxda ah si ay ugu noolaadaan nolosha ay rabaan.

SACU waxaa laga damacsan yahay in uu noqdo barnaamij muddo gaaban oo caawinaya shakhsiyaadka qaba I/DD inta ay ku jiraan dhibaatada. Marka ay ka baxaan dhibaatada, SACU waxaa looga dan leeyahay inay ku caawiso inay ku noqdaan bulshadooda asalka ah. Laakiin, waqti kadib, dad badan ayaa SACU iska joogay waqti dheer. Joogista muddada dheer waxay sababtay in kharashku sii sare kaco. Shakhsiyaadku waxay u

baahan yihiin taageero dheeraad ah si ay guryahooda ugu noqdaan si nabad iyo guul leh.

Miisaaniyadda Uu Ku Taliyay Badhasaab Kotek ee 2025-27 ayaa ka kadalbatay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) inay qorshe cusub u abuurto SACU. Qorshaha cusub wuxuu diiradda saari doonaa daryeelka muddada-gaaban si dadka loogu caawiyo inay ku noqdaan bulshooyinkoodii. Waxaa uu sidoo kale raadin doonaa siyaabo lagu ilaaliyo xasiloonida kharashyada.

Mashruuc dib loogu habaynayo SACU ayaa hadda bilaabanaya. ODHS waxay shaqaalaysiisay Kooxda Adeegyada Aadanaha (Human Services Group, HSG) si ay ula shaqeeyaan bulshada I/DD. Si wadajir ah, dhammaanteen waxaan qiimeyn doonaa barnaamijka waxaana ku talinaynaa qorshe cusub. Barasaabka waxaa uu doonayaa in qorshaha:

- Dib xooga loogu saaro SACU barnaamij waqti-gaaban si loo helo xasilin.
- Uu eego tirada inta guri ee SACU ugu baahan tahay habkan cusub.
- Lagu sii hagaajiyo barnaamijka si loo bixiyo adeegyo ka sii wanaagsan, oo gaar loo leeyahay si loo caawiyo dadka dhibaataysan.
- Lagu hubiyo in adeegyadu ay ka taageeraan shakhsiyaadka ku soo laabashada bulshadooda marka ay diyaar yihiin.

HSG waxay la hadli doontaa dadka deggan SACU, shaqaalaha, qoysaska, u-doodayaasha, ururada, sharci-dejiyeyaasha, iyo la hawlgaleyaasha bulshada si ay wax uga bartaan khibradahooda. Waxay jawaab-celin ka

heli doonaan dadkii horay u daganaa SACU kuwaas oo hadda kudhex nool bulshadooda asalka ah. Waraysiyadan iyo waresiyada kooxaha diirada ayaa dhici doona bisha Maarso.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku biirto kooxda diirada ama waraysi, fadlan la xiriir ODDS. Waxaad wici kartaa 503-945-5811 ama iimayl ugu dir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

Waxaan qorshaha la soo jeediyay u diri doonaa Barasaabka iyo Sharci-dejinta Gobolka Oregon bartamaha Abriil. Waxay dib-u-eegis ku sameyn doonaan qorshaha.  Waxay go'aansan doonaan waxa ay yihiin isbeddelada lagu samaynayo SACU. Waqtiga ugu horeeya ee isbeddelo kasta ay dhici karaan waa Luulyo 2026. Waxaan haysanaa in ka badan hal sano oo aan ku wada-shaqeynayno si aan ugu diyaargarowno isbeddelo kasta. Wax badan ka ogow Su'aalaheena Inta Badan La Isweydiiyo.

Waxaanu rajeynaynaa inaad qayb ka noqon doonto mashruucan muhiimka ah. ODDS waxaa ka go'an inay dadka degan SACU ka dhigto kuwo caafimaad qaba, bedqaba, faraxsan oo la taageerayo inta aan si wadajir ah ugu shaqaynayno si aanu u abuurno mustaqbal wanaagsan.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

---

Isku diiwaangeli kolba wixii soo kordha xafiiska ODDS.

Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.

Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, far waaweyn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidaysid. Iimayl kudir dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalka ku adag yahay.